## XANAADADA HOOYADA UURKA LEH

- Qoysaska ilmaha uurka ku jira sugaya
- La socodka uurka iyo gabadha uurka leh iyo ilmaha uurka ku jira caafimaadkiisa kor u qaadista bad qabkooda.
- Taageerada xiriirka lammaanaha iyo waalidnimada.
- Taageerada iyo hagitaanka dhalmada, naasnuujinta, iyo daryeelka ilmaha.
- Taageerada dheeraadka ah iyo sii waditaanka daryeelka haddii loo baahdo.

## XANAANADA DARYEELKA DHALLAANKA

- Carruurta da'doodu tahay 0-6 sano
- Baaritaanada caafimaadka, la socodka korriinka iyo koboca ilmaha, iyo tallaalada.
- Kor u qaadista badqabka qoysaska carruurta leh.
- Taageerada korriinka, waalidnimada iyo xirriirka lammaanaha.
- Taageerada dheeraadka ah iyo sii waditaanka daryeelka haddii loo baahdo.
- La shaqeynta adeegyada kale ee qoysaska carruurta leh.

## DARYEELKA CAAFIMAADKA AFKA IYO ILKAHA

- Baaritaanka caafimaadka afka ee loogu talagalay qoysaska uu u dhalnayo ilmahoodii ugu horeeyey.
- Baaritaanka caafimaadka afka ee loogu talagalay carruurta.
- Kor u qaadista caafimaadka afka iyo ilkaha.
- Daaweynta iyo la socodka cudurrada afka iyo ilkaha.

# ADEEGYADA CAAFIMAADKA EE LOOGU TALAGALAY QOYSASKA CARRUURTA LEH EE FINLAND



Adeegyada caafimaadka aasaasiga ah ee laga helo xanaanooyinka caafimaadka hooyada uurka leh iyo daryeelka caafimaadka iskuulku waa u bilaash qoysaska uurka leh iyo carruurta da'doodu ka yar tahay 18- jirka.
Adeegyada daryeelka caafimaadka afku waa u bilaash carruurta ka yar 18- jirka.

Niitty2

Euroopan unionin osarahoittama

Tampereen ammattikorkeakoulu

Pirkanmaan hyvinvointialue

TAMPERE

## DARYEELKA CAAFIMAADKA ISKUULKA

- Carruurta da'doodu tahay 7 ilaa 16 sano.
- Baaritaanka caafimaadka ee la socodka korriinka iyo koboca ilmaha.
- Kor u qaadista bad qabka qoysaska carruurta leh.
- Taageerada ku saabsan waalidnimada iyo xiriirka lammaanaha.
- Qiimeynta taageerada dheeraadka ah ee carruurta iyo qoysaska, hagitaanka iyo sii waditaanka daryeelka haddii loo baahdo.
- La shaqeynta adeegyada kale ee qoysaska carruurta leh.

## DARYEELKA CAAFIMAADKA ARDAYDA

- Ardayda dugsiga sare, dugsiga farsamada iyo tacliinta sare.

## TAAGEERO DHEERAAD HADDII LOO BAAHDO:

- Terabiyada hadalka
- Terabiyada waxqabadka iyo waxqabadka shaqada
- Fisioterabiyada
- Terabiyada nafaqada
- Cilmi nafsi yaqaan
- Sooshalada iskuulka

somali

## MARKA ILMUHU XANUUNSADO

- Tusaale ahaan: dhaga xanuunka, madax-xanuunka ama qandho hayneysa muddo dheer, gubasho yar, ama shil.

La xiriir **rugtaada caafimaadka** taleefan ahaan ama si dhijitaal ah.



## HADDII UU ILMUHU AFKA GELIYO, LIQO AMA MAQAARKOODA UU TAABTO WALAX SUN AHI

Wac **Xarunta Macluumaadka Sunta**
tel. 0800 147 111

# ADEEGYADA CAAFIMAADKA EE LOOGU TALAGALAY QOYSASKA CARRUURTA LEH EE FINLAND



Booqashada rugta caafimaadka, rugaha goobaha caafimaadka iyo waaxda heeganku waa u bilaash carruurta ka yar 18 jirka.

Daryeelka bukaan-jiifka ee isbitaalka waa lacag.

Niitty2
Euroopan unionin osarahoittama
Tampereen ammattikorkeakoulu
Pirkanmaan hyvinvointialue
TAMPERE

## MARKA ILMUHU U BAAHAN YAHAY CAAWIMAAD DEGDEG AH

- Tusaale ahaan: calool xanuun daran oo kedis ah, nabar weyn gaadho, ama neefsashadu ku adkaato.

Wac **heeganka caawimaada**
tel. 116 117

## MARKA AY TIMAADO XAALAD HALIS AHI

Wac **lambarka degdegga**,
tel. 112



somali